MACLUUMAADKA BOOQDAHA

MAANTA
Xubin Noqo!

Waxa lacag kaaga dhigmi doontaa kaliya booqashooyin ah 3-4! Maanta ku soo biir oo dib u cesho qiimaha galitaanka maanta.

Weydii lacag-qabte kasta ama booqo www.BostonChildrensMuseum.org oo guji Xubinnimo (Membership).

Xubinnimo waxay noqon kartaa HADIYAD weyn!

Saacado

Furan Maalin Kasta 10-ka galin hore – 5-ta galin dambe
Jimce 10-ka galin hore – 9-ka galin dambe

Xidhan Maalmaha Mahadnaqa & Kirismas.
Xidhan Goor Hore Fiidka ka Horeeya Kirismas &
Fiidka ka Horeeya Sannadka Cusub.
Furan Maalinta Sannadka Cusub.

Adeegyada booqdaha

FUDUDEYNTA GALITAANKA
Wakhtigan waxana aanu bixinaa maabab far waaweyn, buugaag yaryar oo leh sheekooyin bulsho, iyo bandhig tilmaan-bixin oo fududeynaya galitaanka oo laga helo Miiska Macluumaadka.

ATM
Daqaba 1 gudaha Dukaanka ku yaala BCM.

MIISAS BEDDELID XAFAAYAD AMA DHAYBAR OO AH MUSQUL KASTA
FIIRO: Xeerarka caafimaadka ayaa rabaa in dhammaan xafaayadaha ama dhaybarada lagu beddelo gudaha musqulaha. Xafaayado la tuuri karo ayaa la heli karaa.

DHIGASHADA KOODHADHKA/BOORSO
Daqaba 1 Qolka Koodhadhka & Kabadhada.

GARGAARKA KOOWAAD & DADKA LUMAY
Weydii qof kasta oo ka tirsan shaqaalaha!

WAX LUMAY & WAX LA HELAY
Daqaba 1 Miiska Macluumaadka.

KALKAALIN CAAFIMAAD
Meel kastaa waa caadi. *PlaySpace* ayaa bixisa qol kalkaalin caafimaad oo gaar ah.

BAARKIN — WAA LA JOOJIYAY
Garaashka Farnsworth Street Garage iyo Garaashka Stillings Street Garage labaduba waxay qiime-dhimis siiyaan booqdeyaasha madxafka. Cadeymaha waxa laga bixiyaa Miiska Macluumaadka.

DHIGASHADA KURSIGA ILMAHA
Dabaqa 1 Qolka Koodhadhka.

Wax kale oo la qabto

DUKAANKA OO KU YAALA BCM
Waxa aad heli kartaa hadiyado maaweelo oo xiise badan, ciyaaro, iyo dhar marka aad booqasho ku timaadid Madxafka! Si aad u ogaatid saacadaha ciidaha ee gaarka ah iyo gargaar lagaa siiyo hadiyadaha, fadlan Dukaanka ku yaala BCM ka wac (617) 426-6500 gudbin 236.

BARNAAMIJYO & MUNAASABADO
In kasta ha ahaato da'daadu, Madxafka Caruurta ee Boston wuxu bixiyaa waxqabadyo kicinaya malo-awaalkaaga. Maalin kasta fiiri jadwalkayaga barnaamijyada iyo munaasabadaha, ama nagu soo booqo *www.BostonChildrensMuseum.org/calendar*.

XAFLADAHA DHALASHO
Xaflad dhalasho oo gaar ah ku dabaaldag Madxafka Caruurta ee Boston. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah wac (617) 426-6500 gudbin 380 ama *www.BostonChildrensMuseum.org/visit/events-and-parties/birthday-parties*

MUNAASABADAHA & HAWLGALADA SHIRKADEED
Si aad xiise ugu yeeshid shirarkiina, munaasabadaha shirkadeed, xafladaha ciideed, iyo aroosyada ku qabso munaasabadaada soo socota Madxafka. Si aad noo wareysatid ama u diiwaangashatid xafladdaada, soo wac (617) 426-6500 gudbin 216 ama booqo *www.BostonChildrensMuseum.org/visit/events-parties.*

BOOQASHOOYIN KOOX
Kooxaha dugsi iyo beel waxay diyaarsan karaan inay booqadaan Madxafka iyada oo la siinayo barnaamijyo ay hogaaminayaan shaqaale iyo kuwa iyagu ay is hogaaminayaan. Fadlan booqo bartayada internetka oo ah *www.BostonChildrensMuseum.org/visit/group-visits* ama soo wac (617) 426-6500 gudbin 405 si aad u heshid macluumaad dheeraad ah.

JIDKAYAGA CAGAARAN
Qor fikradaha cagaaran ee laga ururiyay rugaha ku yaala Madxafka oo internetka iska qor barta ah *www.OurGreenTrail.org* si aad ciyaarista uga sii wadid guriga.

WAREEGGA MAQAL EE CAGAARAN
Waxa uu diiradda saarayaa astaamaha dhisme ee muhiim ah ee keenay inaanu kasbanayo shahaadada LEED® Gold oo uu bixiyo Golaha Dhisme Cagaaran ee Maraykanka. Faahfaahinta weydii Miiska Galitaanka.

Siyaabo lacag kuugu dhiganto

$1 Habeenada Jimce, 5-ta – 9-ka galinka dambe

KAADHKA EBT – Na tus kaadhkaaga oo bixi kaliya $2 halkii qof illaa 4 qof inta aad raacisid aqoonsi Massachusetts oo sawir leh.

WARAAQ QIIME-DHIMIS LAYBAREERI – Waxa aad heli kartaa galitaan qiimihiisu yahay nus oo ah illaa 4 qof marka aad keentid waraaq qiime-dhimis laybareeri oo aan dhicin. Booqo www.bpl.org/branches si aad u ogaatid laybareeriyada ka qaybgalaya qiime-dhimistan.

QIIME-DHIMIS AH SAACADDA UGU DAMBEYSA – Booqdeyaasha galaya Madxafka ka dib 4-ta galin dambe (Sabti - Axad) waxay helayaan galitaan qiimihiisa nus la dhimay. Qiime-dhimistani ma khuseyso habeenada Jimce.

QIIME-DHIMIS MACALLIN – Galitaan bilaash ah ayaa la siinayaa macallimiinta New England (K-8). Waxa ku jira MA, NH, CT, RI, VT, iyo ME.

QIIME-DHIMIS CIIDAN – Shaqaalaha Ciidanka Maraykanka ee Firfircoon ama qof ka tirsan ku-tiirsaneyaashooda waxa la siin doonaa galitaan ah sharfid.

QIIME-DHIMIS WGBH – Xubnaha WGBH waxa la siinayaa galitaan guud oo laga jaray $1 oo ah illaa 4 qof.

BOSTON CHILDREN'S MUSEUM

308 Congress Street
Boston, MA 02210
(617) 426-6500
www.BostonChildrensMuseum.org



Sponsored by:

MCC
masculturalcouncil.org

DABAQA 1

QAYBTA GALITAANKA (ATRIUM)
Qaybta Galitaanka ayaa ah meel laga helo macluumaad oo lagu qorsheeyo booqashadaada.

KID POWER (FIRFIRCOONI CARUUR)
Wad baasgeel, ciyaar qoob-ka-ciyaar, meel fuul, oo ka baro dheeraad sida qoysasku u heli karaan nolol intii hore ka caafimaad badan, oo ka firfircooni badan.

MASRAXA CARUURTA (KIDSTAGE)
Arag oo ka qaybgal riwaayado hadda socda oo laga qaybgali karo. Waxay socdaan 15-30 daqiiqadood. *Tigidhadu waa bilaash waana ay xadeysan yihiin tiro ahaan. Waxa laga heli karaa Miiska Macluumaadka ee Galitaanka iyada oo dadka loo siinayo sida ay u soo kala horeeyaan.*

QAYBTA HORE
Qaybta hore ee dhexe waxay leedahay aragyo biyo oo la yaab leh waxana lagu soo bandhigaa noocyada kala duwan ee ah waxyaabaha laga heli karo gudaha iyo dibadda Madxafka.

KORITAAN NEW BALANCE®
Waa farshaxan la koro oo ah saddex dabaq oo ka sameysan salaxyo qalooca oo midab dhalaalaya lagu rinjiyeeyay.

DHUL-CIYAAREEDKA SAYNISKA
Joogso oo samee BAATHITAAN, samee XUNBO, oo kubado golof ku dulundulcee JIDAD TARTAN, oo booqo diin-badeedyo iyo masas.

DUKAANKA KU YAALA BCM
Dukaanka Madxafka ee ku yaala BCM waa meel xiise leh oo lagu hakado inta aad ku jirtid booqashadaada Madxafka. Waxa yaala hadiyado leh hal-abuuris, alaab ciyaar, buugaag, iyo muusig, oo dhammaan si gaar ah loogu doortay caruurta iyo qoysaka!

BEERTA BIYAHA KU SII JEEDA
Beerta Biyaha ku sii jeeda ee dadweynaha waxa laga helaa aag xor ah, furan, ammaan ah oo leh waxbarasho.

DABAQA 2

CARWADA FARSHAXANKA
Yeelo hal-abuuris! Soo fiiri jadwalka maanta ee loogu talagalay siminaarada & oo samee hal-abuurid! Fiiri jadwalka siminaarada & tababarada farshaxan ee ah iska kaalay.

ARTHUR & FRIENDS
Sahami aagaga la yaqaan ee Arthur®, D.W.®, iyo saaxiibadood iyo qoyska.

BANDHIGGA GAARKA AH
Sahami goobta dabacsan ee laga helo bandhigyo xiise iyo ka-qaybgal leh.

QOLKA CAAMKA AH (THE COMMON)
Qolka Caamka ah waxa uu leeyahay jadwal munaasabado oo firfircoon.

INTA KA HADHSAN DUGSIGA BARBARADKA (COUNTDOWN TO KINDERGARTEN)
Dugsiga barbaradka oo diyaar loo noqdo waxay isbeddel weyn u keeni kartaa galitaanka ilmaha ee waxbarashada qaabeysan.

CARWADA (THE GALLERY)
Aag dabacsan oo loogu talagalay farshaxanka la xidhiidha bandhigyada iyo waxqabadyada.

MIISKA SHAQEYNTA EE JOHNNY (JOHNNY'S WORKBENCH)
Xidho muraayadaha indhaha iyo marada wasakh celinta oo aan mashquul noqono!

FIRFIRCOONIDA CARUURTA (KID POWER)
Firfircoonida Caruurtu waxay qoysaska ku dhiirigalinaysaa inay ku noolaadaan nolol sii caafimaad badan, oo sii firfircooni badan.

DUNIDA PEEP
Iyada oo ku saleysan taxanaha caruurta ee dhaqdhaqaaqa leh ee WGBH—baadh, u fiirso, oo daahfur cajaa'ibka dunida.

AAGGA CIYAARTA
Ku istareex aaggan gaarka ah ee kaliya loogu talagalay caruurta jirta saddex sanno iyo ka yar. Arrimaha ku saabsan korniinka ilmaha ku akhriso Qolka Adeegyada Qoyska.

DABAQA 3

MADOWGA BOSTON
Timo qurxin ka sameyso meheradda timo qurxinta Afrikaanka ee la yidhaahdo African Queen Beauty Salon oo qoob-ka-ciyaar ku ciyaar Makhaayadda Kaab Ferde.

AAGGA DHISME KA SOCDO
Baabuur xamuul, cagafcagafyada Bobcats™, koofiyado adag, iyo dubeyaal waaweyn! Kaalay oo caruurta la dhis magaalo.

CARWADA GLOBAL (GLOBAL GALLERY)
Carwada Global waxay martigalisaa bandhigyo caan ah oo laga keenay dhammaan dunida. Kaalay soo gal oo warag wax cusub!

AQALKA JABAANIISKA
Sahami aqal jabaniis oo ah taariikh hore oo dhab ah.

JIDKA KYOTO
Ku lugee jid ah magaalada Kyoto ee Jabaan.